# Khabiirada oo Khibradda leh: Ghazal iyo Nidal 6-da bilood ee ugu horeysay

Akhri wax ku saabsan Ghazala iyo Nidal 6-da bilood ee ugu horeysay ee dib u dejin UK.

Qoysaska waxay sugi karaan dib u dejinta sannado badan, sidaas darteeda waa mid la fahmi karo in la maqlo inay Ghazala iyo Nidal ay aamini waayeen markii loo sheegay inay dib u dejin ku aadayaan UK!  Waxay nala wadaageen anaga woqtigood iyo waayo aragnimadooda ee ku noolaanshaha UK iyo waxa ay heleen 6- dooda bilood ugu horeysay ay joogeen halkaan sida ay ahaayeen. Ghazala iyo Nidal waxay nooga sheekeeyeen waaya aragnimadooda ilaa hadda, laga soo bilaabo abuurista geedaha iyo beddelashada kaararka kirismaska si loo go'aamiyo sida ay u isticmaali karaan shahaadadooda halkaan.

**Sidee ayaad dareenaty imaatinka UK?**

**Ghazala:** Runtii waan ku faraxsanaa imaatinka UK, waddanka kaasoo noo furay gacmahiisa aniga iyo qoyskeyga. Halkaan waxaan u imaanay mustaqbalka gabdhaheena, iyo si aan u oggaano inay gabdhaheena ay halkaan fursado ka heli doonaan, taasi waa wax mida naga dhigtay inaan aad u faraxno. Maalinta duulimaadka, waxaa naga buuxay dareemo kala duwan. Waxaan ku faraxsaneen ugu dambeyntii inaan u safreyno UK, laakiin waxaan ka murugnay ka tagista saaxiibada ay joogaan Lubnaan. Oo waxaan dareenay walaac sababtoo ah magaraneyno waxaan runtii ku soconay. Waxaan u maleynayaa dhammaanteena, dadka waaweyn iyo carruurta, dhammaan qaabkaan way dareemeen.

Markii ugu horeysay oo noola sheegay in naloo aqbalay dib u dejinta, ma rumeysan karin – waxaan u maleynay inay nagu kaftamayaan! Waxaan ku dhahay ayaga “runta keliya isheeeg – yaa tahay oo maxaa isoo waceysaa?”. Laakiin ka dib waxay dhaheen “maya, runtii, waxaan kuu sheegi haynaa runta!”. Xitaa markii UNHCR iweydiisay inaan la kulmo ayaga, shirka dhaxdiisa Weli waxaan ka fikiraaye ‘runtii tan ma dhaceysaa?’. Ma aan u dareemin inay run tahay, sidaas darteeda waxaan sii waday inay ka shakiyo waxa ay dhahaayaan – laakiin sababtoo ah keliya ma rumeysan karin inay tan ugu dambeyntii dhaceyso! Wacitaanka labaad aan qabanay, markii ay noo sheegeen inaan ugu socono UK dib u dejin, oo waa marka aan dareemay farxad aad u weyn sababtoo ah waxaan ogaa inay gabdhaheyga ay

awood u yeelan doonaan inay nolol fiican ka helaan UK, gaar ahaan sababtoo ah waxay heli doonaan waxbarasho wanaagsan. Waan ognahay dad fara badan ay rabaan inay imaadaan UK gaar ahaan waxbarasho, marka aad ayaan ugu faraxsanaa inaan ogaado inay tani heli doonaan gabdhaheyga.

Woqtiga ay isoo waceen, Nidal wuxuu joogay shaqada, marka waan wacay si aan ugu sheego in nala aqbalay dib u dejinta UK. Aad ayuu ugu farxay inuu arintaan maqlo! Markaan dadka kale u sheegay, iyagana aad ayay ugu farxeen.

**Nidal:** Marka Ghazala isoo wacay si iigu sheego aqbaartaan, ma rumeysan karin ugu horeyntii - Waxaan u maleeyay inay igu kaftameyso aniga! Laakiin markaan ka wada shakeysaneynay, waxaa isoo baxday tani inay run tahay. Keliya markaas ayaan ugu dambeyntii u oggolaan karaa nafteyda inaan ku faraxsanaado arinkaan.

**Sidee ayay ahayd nolosha Lubnaan?**

**Ghazala:** Lubnaan waa waddan na qaaday anaga, oo waxaan ku nooleen halkaas todobo sano ama sideed sano, oo abaal ayaan ugu haynaa waxa waddanka uu noo sameeyay anaga. Marka aan ku nooleen halkaas waxaan is dhexgalnay bulshada oo waxaan ka sameystay saaxiibo halkaas. Laakiiin tayada nolosheena ma wanaagsaneen, mana ahan meel fudud oo aad dib uga dhisan karto noloshaada. Gaar ahaan waxaan na haayay walaacyo badan oo ku saabsan waxbarashada carruuteena, maadaamaa aysan awoodin inay helaan dhammaan qalabka waxbarashada si ugu caawiyo inay dhigtaan dugsigooda, sidaas darteeda ma dareemeynin inay waxbarashadooda ay wanaagsaneed. Waa sababta tani aan u dhahay aad baan ugu faraxsaneen marka noola sheegay inaan imaan doono UK, keliya waxaan ka sii fikireynay fursadaha gabdhaheena.

Lubnaan gudaheeda helitaanka shaqada waa mid adkeyd. Waxaan raadiyay shaqo laakiin ma heli karin wax aniga ii qalma. Waxaan dhameeyay Jaamacadda Aleppo oo ku taala Siiriya, oo shaahdadeyda waxay ahayd cuntada iyo beeraha, ku takhsusay cilmiga cuntada – waxyaabaha ay ka mid yihiin u aadida warshadyaasha si ay u fahmaan sida cuntada loo sameeyay, maadooyinka ku jira iyo tayada cuntada. Laakiin waan waayay khibrada shaqad ee tan si ay iiga caawiso inaan helo shaqo ku habboon oo mushaar wanaagsan leh ee Lubnaan. Oo sidaas beddelkeeda waxaan tabarucaad ahaan ula shaqeeyay kaniisadda, anigoo caawinaayo si aan u qeybiyo cuntada ee qaxootiga.

**Nidal:** Waxaan hore ugu soo shaqeeyay Lubnaan, xitaa ka hor inta uusan bilaabmin colaadda Suuriya, oo sidaas darteeda waxaan horeyba u bartay dalka iyo

suuqa shaqada ee halkaas. Tani waxay ii fududeeysay inaan helo shaqo, oo aan u leeyahay khibrad suuqa shaqada ee Lubnaan.

**Sidee ayay ahayd nolosha haween ahaan Suuriya markaad joogtay iyo Lubnaan, oo wax farqi ah miyaa u dhaxeeya haweenay ahaan nolosha UK.**

**Ghazala:** Aniga shaqsi ahaan, keliya waxaan ka hadlyaa khibradeyda aniga aan leeyahay, ma dareemaayo inuu jiro farqi ah sida aan dareemaayo haween ahaan Suuriya iyo Lubnaan, marka lesku barbar dhigo UK. Mawalba sideyda ayaan ahaan jiray, weligeyga ma dareemin inuu farqi uu jiro habka la iila dhaqmay mid ka mid ah dalalka aan ku noolaa.

Marka imaansha waddan cusub iyo dhaqan cusub, caqabadda ugu badan wax waaye barashada luuqadda cusub. Aniga, barashada luuqadda cusub waxay ii ahayd mid wanaagsan, waxaan dareemay wax aan qaban karo.

**Nidal:** Halka oo aniga, aan oggaaday inay igu adag tahay barashada luuqadda. Caqabadda luuqadda ayaa runtii tahay sheyga ugu adag.

**Waa maxay waayo aragnimadaadaan carruurtaada, ka tagista Lubnaan iyo imaanshaha UK?**

**Ghazala:** Gabdhaheena waxay sameysteen xariir saaxiibtanimo markay Lubnaan joogeen, oo sidaas darteeda waxay ka xumaadeen inay ka tagaan saaxiibadooda oo ay galaan wax ay garaneynin. Ma garanayaan wax ay kala kulmi doonaan UK. Laakiin markaan imaanay halkaan, gabdhaha waxay arkeen kooxda Community Sponsorship, waxay arkeen gurigeena cusub oo waxay arkeen mid kasta oo ayaga ka mid ah qol jiif ah oo u gaar ah – tani waxay dareensiisay inay aad ugu fiicnaadaan oo ay ku faraxsan yihiin inay halkaan joogaan. Lubnaan markaan joognay, waxaan ku nooleen hal qol, sidaas darteeda gabdhaha weligood ma yeelanin hadda ka hor qof walba qolkiisa u gaarka ah. Durba waxay arkeen tayada nolosha ee UK inay aad uga fiican tahay mida hore ay ku jireen. Halkaan waxaa lagu siineyaa alaab aad ku ciyaarto, oo waxyaabahaan waxay naga caawiyeen inay noo furaan ayaga fikridda ku noolaanshaha halkaan, oo durba waxay bilaabeen inay sii dareemaan farxad.

Aad ayaan ugu welwelay maalinta ugu horeysay ee dugsiga. Markaan ku dejinay dugsiga, waxaan dareemay walaac sida ay ula xariiri doonaan, ayagoon ka garaneynin cidna oo aan saaxiib ku laheen, waxwalba oo iyaga ku cusubyahay iyo kuwa shisheeya ah. Markaan aadno inaan ka soo qaadno gabdhaha dugsiga,

wadnaheyga aad ayuu u qaraacmaayay iyo wuxuu sameynayaa cod dheer, maadaamaa aan garaneynin gobolka ay u socdaan inay joogaan. Laakiin markay i arkeen meel ka baxsan iridda dugsiga, way ii soo carareen oo waxay ii sheegeen sida ay ugu faraxsan yihiin! Sida dugsiga u baray iyaga dadka kale iyo sida qof walba u soo dhoweeyay. Oo aad ayay u faraxsan yihiin hadda dugsiga, laakiin sidoo kale waxay ku faraxsan yihiin inay UK joogaan.

Oo guud ahaan, gabdhaha waxay sameynayaan horumar tacliimeed oo heer sare ah waxay ku fiican yihiin dugsiga. Iyaga si dhakhso ah ayay wax u barteen! Marmarka qaar gabdhaha, marka ay la aadaan aabbahoda bannaanka, waxay u turjumaani doonaan isaga. Oo hadaan arko ereyo Ingiriiska ah oo adag, markaas way i caawin doonaan sidoo kale.

**Maxaad jeclaan laheed inaad sameyso Mustaqbalka?**

**Ghazala:** Mudaanteyda koowaad waxa waaye inaan barto luuqadda. Waxaan u maleynaa mar haddii si wanaagsan aad u barato luuqadda, inay tani markaas ay kuu fureyso albaabo badan adiga, waxayn kuu fududeyn doontaa inaad gaarto waxaad rabto. Oo sababtoo ah waxaan bartay cuntada iyo beeraha sanado badan, waxaan jeclaan lahaa inaan arko fursadooyin kasta oo la xariira shaqada qaybtaan aniga, shaqo shahaadadeyda si fiican looga faa'iideysan karo.

Waxaan sidoo kale oo si tabarucaad ahaan ula shaqeynaaye koox dad ah, meeshaas oo aan ku ilaalino beeraha, abuuritaanka iyo sameynta shaqada dhulka, sida jarista geedaha qaabyo kala duwan. Waxaan tabarucaadka aan u sameynaaye sababtoo ah waxaan rabaa inaan dib u siiyo waddankii aniga iyo qoyskeyga na soo qaadeen, sidaas darteeda hadda waxaan joogaa halkaan Waxaan rabaa inaan gacan ka geysto daryeelka deegaanka halkaan. Runtii waan jeclahay inaan sameeyo tabarucaadka sidoo kale, waxay i dareensiineysaa farxad si aan dib ugu siiyo qaabkaan. Waa wax marwalba aan ku faraxsanahay, xitaa markaan si tabarucaad ahaan ugu shaqeeyay Lubnaan. Markaan geedaha beeraayo, way fiican tahay inaan ku fikiro inay dadka kale ay maalin awoodi doonaan inay harsadaan geedahaas iyo deegaankaan. Sidoo kale, qaab waxay itahay dadka kale aan isku dhexgali karno, aan u barto xirfado cusub, aan sameysto xariir saaxiib iyo si aan ugu celceliyo xirfadaha luuqadeyda.

**Nidal:** Waxaan diiridda saareyaa barashada luuqadda, sidaas darteeda Si fudud dadka ula xariiro. Hore waxaan ka soo shaqeeyay harqaanle ahaan, sidaas awgeed waxaan jeclaan lahaa inaan mar kale awoodo inaan sidaas sameyo. Haddii macquul ay tahay hal maalin, ka dib waxaan jeclaan lahaa inaan furo dukaan harqaanle ah oo aniga iska leeyahay.

**Ghazala:** Haddii wax kasta ay jeexmaan ka dib isaga ayaa hagaajin doona. Waxaan jeclahay inaan ku kaftamo inaan guursaday xirfadiisa tollitaanka dartiisa.

**Sidee ayuu ahaa jiilaalka ugu horeeyay ee aad joogtay UK?**

**Ghazala:** Runtii waxaan rajeynaayey hawada inay aad ugu sii xun tahay halkaan. Lubnaan gudaheeda xilliga jiilaalka, waxay noqon kartaa mid aad u qabow iyo roobab, iyo maalmaha qaarna roobka ma istaago. Sidaas darteeda, jiilaalka UK uma xuma sida aan filaayey. Lubnaan, kirismaska xitaa waa la dabaal degaa laakiin waxa aan halkaan ku oggaaday dabaaldega Kirismaska aad u weyn yahay. Waxaan aaadnay London si aan u aragno sharaxaadda Kirismaska iyo leerarka. Sidoo kale, waxaan runtii jecelnahay tilmaanta fiican ee kaararka Kirismaska. Markay imaadaan gabdhaha guriga ay ka yimaadaan dugsiga, waxay na tuseen kaararka Kirismaka oo ay ka soo haleen saaxiibada. Oo markaan aadnay kuliyadda, macllaminteena waxay na siiyeen kaararka Kirismaska. Waxay ahayd mid qurux badan oo ma aheen wax aan horay u soo argnay. Dugsiga gabdaha, waxaa ka socday dabaaldega Kirismaska iyo ciyaarta dugsiga oo aan u tagnay si aan u soo aragno.  Gabdhaha waxay ku jireen inay heeso ka qaadaan dugsiga dhaxdiisa, kuwaas oo ay aad ugu faraxsanaayeen.

**Sidee ahayd 6-da bilood ee la soo dhaafay, laguu soo dhoweeyay iyo sida ay kuu taageereen kooxda Community Sponsorship?**

**Ghazala:** Markaan joognay Lubnaan, waxaan qaadan jirnay cashar meeshaas oo nalagu soo bandhigi jiray nolosha UK iyo waxaan ka baranay waxa nalaga rajeynaayo. Iyo sidoo kale waxaan aragnay muuqaal, kaasoo kooxda Community Sponsorship ay isbarayaan naftooda, mid kasta wuxuu leeyahay cidda uu yahay. Tani waxay naga caawisay inaan dareeno sida inaan garaneynay kooxda wax yar ka hor intaan la kulmin iyaga. Sidaas darteda, markaan imaanay UK oo aan kula kulannay kooxda garoonka diyaaradda, waxaan mid walba ugu yeernay magacyadooda oo waxaan dareenay inaan hore u kasi jirnay.

Kooxda waxay naga caawiyeen inaan dhexgalno bulshada halkaan oo waxay naga caawiyeen inaan u gudubno dhinacyo kale ee nolosha ah. Waxyaabaha sida hagaajinta ballamaha GP-ga, ka dukaameysiga suuqa weyn, ka caawinta inaan iska diiwaangeliyo kuliyadda iyo in gabdhaha dugsiga la geeyo, iyo waxyaabo kaloo

badan oo la xariira nolosha halkaan. Way nala socdeen tilaabo kasta oo la qaadaayo.

Markaan kow imaanay oo waxaan aragnay sida guriga nalooga haweeyay, ugu yaraan waanba ilownay inaan waddankaan ku cusubnahay sababtoo ah waxaan horey u aragnay nolosheena cusub ee guriga ay noo sameeyeen anaga. Tani waa sheyga aan ugu mahad celineyno qof walba oo ka mid ah ee kooxda.

**Maxaa talo ah ayaad siin laheed qoysaska kale oo dib u dejin u heleen UK?**

**Ghazala:** Waxaan u sheegi lahaa qoys walba oo cusub inay waxyaabo ay ka fikirin, ay noolaadaan woqti walba.  Haddii aad dareemeyso naftaada inaad wax walba ka welwelsan tahay, ka dib isku dey inaad si degan waxyaabaha ugu dhowaato. Ogow waxaa jira waxyaabo badan oo wanaagsan adiga ku sugaayo, oo ay ka mid yihiin fursadaha iyo waxbarashada ee carruurtaada.